



Qandhooyinka Fayraska ee Dhiigbaxa Leh (Viral Hemorrhagic Fevers)

Waa maxay qandhooyinka fayraska ee dhiigbaxa leh?

Qandhooyinka fayraska ee dhiigbaxa leh (viral hemorrhagic fevers) (VHF) waa cuduro ay sababaan kooxo fayrasyo ah sida fayraska Ebola iyo fayraska Marburg. Guud ahaan, qaadidda fayrasyadaas waxay sababi kartaa cuduro culus oo leh qandho iyo dhaawac gaadha xididada dhiigga taasoo saameysa hababka xubno jidhka ah oo badan. Dhaawaca gaadha xididada dhiigga waxa uu qasi karaa qulqulka dhiigga oo sababi karaa dhiigbax daran. Inkasta oo qaar ah cudurada VHF ay yihiin khafiif, qaar badan ayaa keeni kara dhimasho. Cudurada kale ee VHF waxa ka mid ah qandhada Lassa (Lassa fever), qandhada hurdiga ah (yellow fever), Crimean-Congo iyo qandhooyinka fayraska ee dhiigbaxa leh ee Dunida Cusub (New World hemorrhagic fever viruses).

Waa maxay astaamaha cudurada qandhooyinka fayraska ee dhiigbaxa leh?

Inkasta oo astaamuhu u kala duwanaan karaa fayrasyadaa, astaamaha bilawga ah ee VHF waxa ka mid ah qandho, finan, juucjuuc jidh, madax-xanuun iyo daal. Waxa kale oo laga yaabaa in bukaanka si daran u jirran lagu arko calaamado ah shoog ama dawakh, dhiigbax iyo dhaawac soo gaadhay xididada dhiigga ee xubnaha jidhka ee waaweyn sida beerka, sambabada, habdhiiska dareemayaasha ama nerfaha, iyo marmar kelyaha. Caadi ahaan, astaamuhu waxay soo baxaan gudaha maalmo laakiin waxa dhici karta in aanay soo bixin ilaa dhawr todobaad ka dib soo-gaadhista.

Sidee bay qandhooyinka fayraska ee dhiigbaxa leh u fidaan?

Bini'aadanka dhawr siyaabood ayuu cuduradani ku soo gaadhi karaan:

- Taabasho kaadi, xaar, candhuuf ama dheecaan kale oo ka soo baxay jirka iyo xayawaanka kale oo la mid ah oo cudureysan.
- Taabasho jidhka xayawaan dhintay oo cudureysan.
- Qaniinyo kaneeco ama shilin cudureysan.
- Taabasho xayawaan ay qaniineen kaneeco ama shilin cudureysan.
- Taabasho ama xidhiidh soke oo lala yeesho dad cudureysan ama dheecaanada jidhkooda. Fayrasyada qandhooyinka leh dhiigbax ee Ebola, Marburg, Lassa, qandhada dhiigbaxa leh ee Dunida Cusub, iyo Crimean-Congo waxay u fidi karaan qof-ka-qof ama qofku waxa uu qaadsiin karaa qof kale. Waxa kale oo dadka cudurka qaadsiin karaa siringaha iyo irbadaha uu wasakheeyay dheecaan jidh oo cudureysan.

Halkee ayay dhacdooyinka qandhada fayraska ee dhiigbaxa leh si dabiici ah uga dhacaan?

Fayrasyada qandhada ee leh dhiigbaxa ama VHF waxa laga helaa adduunka oo dhan, laakiin midna fayrasyada VHF dhalad kuma ah Maraykanka. Sababta oo ah fayrasyada VHF oo u baahan xayawaan ama xasharad hoy u ah si ay noolaadaan, cudurada VHF waa ku dhif aagaga ka baxsan meesha uu ku nool yahay xayawaanka hoyga u ah fayraska gaarka.

Jiirka ama dooliga ayaa badanaa sita fayrasyada VHF, laakiin waxa kale oo fayrasyada sidi kara shilinta iyo kaneecada. Marmar, qof socoto ah ayaa fayraska qandhada ee leh dhiigbaxa ka qaadi kara aag si dabiici ah looga helo fayraska. Haddii uu fayrasku yahay nooc la isugu gudbin karo taabasho ah qof-ka-qof, waxa qofka socotada ahi dadka kale qaadsiin karaa cudurka.

Sidee baa looga hortagi karaa oo loo daweyn karaa dhacdooyinka qandhada fayraska ee dhiigbaxa leh?

Habka ugu waxtarka badan ee looga hortagi karo cudurada VHF ee qofku u tabin karo qof kale waa gooni-soocid lagu sameeyo bukaanka qaba cudurka iyo taxadir la isticmaalo si looga hortago in shaqaalaha caafimaadka iyo dadka kale uu soo gaadho fayrasku. Waa in taxadir gaar ah la sameeyo oo si haboon looga takhaluso qashinka daweynta iyo xubnaha jidhka bukaanka qaba cudurka. Ma jirto dawo u gaar ah daweynta VHF—bukaanka waxa la siiyaa daryeel taageero ah. Bukaanka qaba qandhada Lassa waxa laga yaabaa inay waxtar ka helaan dawada lidka fayraska ee la yidhaahdo ribavirin, haddii goor ah la siiyo inta uu cudurku hayo.

Tallaalka kaliya ee sharciyeysan ee loo aqbalay cudur ah VHF waa ka loogu talagalay qandhada hurdiga ah (yellow fever); hase yeeshee, waa in tallaalka la qaato ka hor soo-gaadhista qandhada hurdiga ah. Waxa cilmi-baadhis lagu hayaa tallaalo tijaabo ah oo ku saabsan dhawr cudur oo ah VHF, laakiin wali lama sharciyeyn ama looma aqbalin isticmaal guud.

Cudurada VHF iyo argagaxisada biyoolooji ah

Xarumaha Xakameynta iyo Ka-hortagga Cudurka (Centers for Disease Control and Prevention) ee federalka waxay fayrasyada qandhada leh dhiigbaxa ku sharaxeen inay yihiin waxyeelayaal loo adeegsan karo hub biyoolooji ah sababta oo ah qaarkood si weyn ayay u faafaan ama loo kala qaadaa, isla markaana waxa si fudud loogu faafin karaa hawada waxana ay leeyihiin awood ay ku sababaan tiro balaadhan oo ah cuduro iyo geeri. Waxa kale oo la og yahay inay ka mid ahaayeen fayrasyo lagu sameeyay cilmi-baadhis hub biyoolooji ah.



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-026
Somali